BIG HOUSING BUILD

Somali | Soomaali

# Howlaha shaqo ee laga qaban doono Flemington

Ogeysiiska Shaqada

Luulyo 2026

homes victoria

## Waxaa la sii balaarin doonaa goobta shaqada si loo sii wado hawlaha shaqo ee la xiriira kaabayaasha iyo adeegyada aasaasiga ah

### Agoosto ilaa Nofeembar

Hawlaha shaqo ee la xiriira kaabayaasha iyo adeegyada aasaasiga ah oo taageeraya dhisida guryaha cusub ee mustaqbalka ee xaafada ayaa socda, waxayna sii socon doonaan ilaa dhamaadka sanadka 2026-ka.

### Waxyaabaha aan sameyn doonno

- Waxaa dhanka koonfureed ee Racecourse Road loo sii balaarin doonaa goobta shaqada si ay usii socdaan hawlaha shaqo ee lagu dhisayo kaabayaasha iyo adeegyada aasaasiga ah
- Waxaa la badeli doonaa meelaha laga galo lagana baxo ee baarkinada baabuurta la dhigto oo u dhaxaysa 120 Racecourse Road iyo 12 Holland Court
- Waxaa sidoo kale meesha laga rari doonaa halka ambalaasyada ay istaagaan iyo goobta ay dadka ku dejiyaan
- Howlo shaqo oo dhulka lagu baarayo ayaa laga qaban doonaa baarkinada baabuurta la dhigto ee u dhaxaysa 120 Racecourse Road iyo 12 Holland Court. Baarkinada baabuurta la dhigto ayaa sii furnaan doona inta ay shaqadu socoto
- Meelo la qodayo iyo caro goobta laga daadgureyn doono
- Dhirta iyo qaar ka mid ah geedaha in meesha laga saaro
- Waxyaabaha khatarta keeni kara ayaa meesha laga saari doonaa haddii laga helo.

Shaqooyinka oo dhan waxaa la dhammaystiri doonaa iyadoo la raacayo habraacyo lagu xaqiijinayo badbaadada, isla markaana lagu yareynayo wixii carqalad dhalin kara.

More Homes For Victorians | VICTORIA State Government

## Waxa la filan karo

- Si joogto ah in isbedel loogu sameeyo baarkinnada baabuurta la dhigto, meelaha laga galo baarkinada baabuurta la dhigto iyo dariiqyada ay dadka xaafada ku lugeeyaan. Fadlan u hogaansan tilmaaha goobta la dhigay iyo shaqaalaha gawaarida kala hagaysa
- In dabayaaqada bisha Agoosto si tartiib-tartiib ah dib loogu furo baarkinnada baabuurta la dhigto ee ka ag dhow 130 Racecourse Road iyo 12 Holland Court
- Waxaa si ku-meel-gaar ah mararka qaar loo xiri doonaa waddada laga baxo ee gasha Racecourse Road. Meel ay baabuurta ka geli karaan ayaa waxaa laga hirgelin doonaa isgoyska leh nalalka taraafikada xilligaas ayada ah
- Si tartiib-tartiib ah ayaa waxaa loo furi doonaa meelaha goobaha shaqada laga wado ee xaafada
- Shanqadh iyo gariir ayaa jiri doonta inta ay shaqadu socoto
- Dhaqdhaqaaqa gawaarida waaweyn iyo baabuur kale ayaa xaafada laga dareemi doonaa
- Shaqaalaha ayaa gashan doona dhar/qalab jooda difaacaya, oo ay ku jiraan dharka badbaadada ee cadcad haddii markaas loo baahdo.

## Waxaa lagu da'daali doonaa in amnigiina la sugo isla markaasna la yareeyo saameynta ka dhalan karta hawlaha waxa lagu dhisayo

- Waddo kale oo cusub oo dadka lugaynaya ay ku geli karaan 130 Racecourse Road ayaa hadda la furay, iyadoo la marayo barxada dadweynaha ee cusub (Murnalung Park)
- Waxaa lala socon doonaa shanqarta, gariirka iyo tayada hawada inta ay socdaan howlaha shaqo ee ka socda meelaha u dhow goobaha shaqada
- Xaafada waxaa la dhigi doonaa calaamada dadka usheegaysa in goobta shaqo ka socoto
- Shaqaale haga gaadiidka ayaa joogi doona meelaha u dhow goobta ay shaqadu ka socoto si ay u hagaan gaadiidka iyo dadka lugaynaya, haddii loo baahdo
- Wadooyin loogu talagalay in caagaga qashinka laga qaado haddii ay xaallad degdeg ahi timaadana dadka la daadgureeyo ayaa furnaan doona.

## Saacadaha la shaqeynayo

Shaqada aan qabaneyno waxaa hagi doona saacadaha shaqada ee caadiga ah ee u degsan golaha deegaanka:

**Isniinta ilaa Jimcaha**
Inta u dhaxaysa 7-da subaxnimo iyo 6-da maqribkii

**Sabtida**
Inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimo iyo 3-da galabnimo

## Waan idinkaga mahadcelinaynaa dulqaadkiina

Waan idinkaga mahadcelinaynaa dulqaadkiina inta aan wadno howlahan shaqo ee muhiimka ah.

More Homes For Victorians | VICTORIA State Government

**Ma qabtaa su'aal ku saabsan shaqooyinkan?**

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan howlahan shaqo ee la qorsheeyay ama aad u baahan tahay turjubaan, fadlan noogu soo dir email flemington@homes.vic.gov.au.

## Khariidada aagga ay shaqadu ka socoto




## Wax badan ka ogow

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Homes Victoria fadlan booqo: homes.vic.gov.au

Waxaa ansixisay soona daabacday Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne.© Gobolka Victoria, Australia, Homes Victoria, bisha Luulyo 2026.